



(Xayawaanka) Diinka Tucker Wuxuu Guriga ku Qaataa Wakhti uu Qolaftiisa ku Xaroodo kuna Fakaro

Waa sheeko farshaxaneed loo qorey in lagu kaabbo wax ka barashada “Xirfadda Diinka”

By Rochelle Lentini, Lindsay N. Giroux
and Mary Louise Hemmeter

ChallengingBehavior.org

The reproduction of this document is encouraged. Permission to copy is not required. If modified or used in another format, please cite original source. This is a product of the National Center for Pyramid Model Innovations with contributions from WI Pyramid Model and was made possible by Cooperative Agreement #H326B170003 which is funded by the U.S. Department of Education, Office of Special Education Programs. However, those contents do not necessarily represent the policy of the Department of Education, and you should not assume endorsement by the Federal Government.

Pub: 05/20/2021



Diinka Tucker waa diin qumane ah. Wuxuu qoyskiisa kula nool yahey dhijaan ama balli yar.


*Salaamu Caleykum!!
Waxaan ahey Tucker.*



Marmar, waxaa dhaca waxyaabo xoog iiga cadheysiya.



Sidan ayey ahaan jirtey marka uu Tucker cadhoodo, saaxiibadii iyo qoyskiisaba wax ayuu ku dhufan jirey, laaddi jirey ama ku qaylin jireyba. Asxiibtiisa iyo qoyskiisuba wey cabsoon jireen, murugoona jireen.




Tucker hadda waxa uu yaqaanaa hab uu
isku dajiyo marka uu cadhoodo




Talaabada 1

Wuu joojin karaa in uu qayliyo, kana reebanaan
karaa gacan qaad/ka hadal!



Talaabada 2

Wuxuu ku xaroon karaa qolofitiisa dabeetana qaadan
karaa sadex neeftuur oo dhaadheer si uu isu dajiyo.



Talaabada 3

Kadib Tucker wuxuu ka fakari karaa
xal u raadinta mushkiladiisa.




Talaabada 4

Marka Tucker hakado ee uu fakaro, jidhkiisu
wuu daggaa waxaanu dareemaa nafis.

Marka uu u adeegsado gacan naxriis badan iyo
hadallo dabacsan, asxaabtiisa iyo qoyskiisuba waxey
dareemaan farxad iyo in ay amaan yihiin.



Qoyska Tucker waxey si wadajir ah uugu tababartaan habka jooji oo fakir iyaga oo isticmaalaya habkan cusub ee Tucker ee qofka lagu dajiyo.



Ku Tababarro Inaad u Fakirtid Sidii Diinka

Bar caruurtaada taloobooyinka loo maro sida dareenka loo xakameeyo ee la isu dajiyo (“u fakir sidii diin”).

- Talaabada 1: Barro dareenadaada.
- Talaabada 2: Nagee oo haki jidhkaaga.
- Talaabada 3: Ku xarood gudaha “qolofaada” oo qaado 3 neeftuur oo dhaadheer.
- Talaabada 4: Dibadda u soo bax marka aad is dajiso oo ka fakir xal.

Tilmaammaha Xirfadda Diinka

- La samee ilmahaaga canjilaadda qolof ku xaroodka diinka mar ay xaaladdisu xasilantahey.
- Maalintaa gudaheeda, samee wakhti ilmaha aad kula tababarafid sidii uu 3 neeftuur oo dhaadheer uu u sameyn lahaa.
- Marka xaaladda dareen kaagu adagtahey adeegso oo samee talaabooyinka isdajinta.
- Ku tababaro talaabooyinkan badiyaa oo ku dhex darso waxyaabaha had iyo jeer aad sameysaan (tuseele ahaan ka hor inata aanad bilaabin in aad walaaladaa la ciyaartid, xilliyada aad buugta akhriyeesid, iyo ka hor howl maalmeedka guriga iwm.)
- U isticmaal sawirada kaadh tilmaameedka bogga kan xigga marka aad ku tababaraneysid talaabooyinka.
- Diyaar unoqo kana caawi ilmahaaga sidii uu u waajihi lahaa haddii niyad jab yimaado ama xasuusi sheekadii ku xaroodka qolofa iyo fikiridda ee sida diinka marka uu cadhoodo ama qaraqmo ilmuhu.
- Sii taageero badan iyo koolkoolin marka ilmahaagu isku dayo inuu isticmaalo talaabooyinkan.
- Aqoonso oo wax fiican ka dheh marka ilmahaagu isdajiyo ee uu xasilaad ku joogo.
- Ka caawi dhamaan xubnaha qoyska oo dhan iney bartaan Xirfadda Diinka ee isdajinta.


Ka Caawi Caruurta Iney ka Fakiri Karaan Xalal Macquul ah

- Weydiiso caawimo.
- Dheh “Fadlan jooji”
- Markaaga sug oo qofka kalena u daa markiisa.
- Soo qaado goor sugto ama wax aad wakhtiga ku cabirtid.
- Weydiiso in laabta lagugu qabto.
- Wakhti nasasho ama biririf ah qaado
- Dheh “Maad ila ciyaari”
- Wadaag wax.
- Adeegso erayo naxariis leh.






Talaabada 1. Barro dareenadaada.



Talaabada 2. Nagee oo haki jidhkaaga.



Talaabada 3. Ku xarood gudaha “qolof-tada” oo qaado 3 neeftuur oo dhaadheer.



Talaabada 4. Dibadda u soo bax marka aad is dajiso oo ka fakir xal.